# Hadda Madaama Aad tahay Dagane Rasmi ah: Digniinaha, Xaquuqda Iyo Waajibaadyada

Now That You Are a Permanent Resident: Warnings, Rights and Responsibilities

## Waxaan haystaa Deganaanshaha Sharciga ah ee Rasmigaa (LPR or "green card holder"). Mudo intee le'eg ayaan ku noolaan karaa oo aan ka shaqayn karaa Dalka Maraykanka?


Sharciga degenaanshaha Rasmiga ah (LPR) malaha taariikh uu dhaco. Taa macnaheedu waa intaad doonto ayaad ku noolaan kartaa kana shaqaysan kartaa wadanka Marayka gudihiisa hadii ayna Dawladu sharciga kaala noqon.

## Taasi ma waxay ka dhigan tahay weligay Maraykanka waan ku noolaan karaa?

Waa mid ku xiran waxyaabo badan. Hadii aad jebisid sharciyada qaarkood ama aadan sharciyada qaarkood siday yihiin u raacin waa lagaala noqon karaa sharciga deganaanshaha rasmiga ah (LPR) kadibna waxaa dhici karta in lagu masaafuriyo.

## Maxay tahay mas'uuliyadda isaarani hadii aan ahay qof haysta Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ah?

Marka lagu siiyo Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ah ee Maraykanka (LPR) waxaa jira mas'uuliyado khaas ah oo lagaa rabo.



1. **Mar walba inaad wadatid kaardhka (LPR Card)**
   Waa inaad wadatid kaarkaaga (LPR) Meelkasta oo aad tegaysid . Hadii ay ku joojiyaan laanta socdaalku waxay ku waydiin karaan cadayn muujinaysa inaad wadanka si sharci ah ku joogtid.

2. **Waa inaad Soo sheegtid hadii Cinwaankagu isbadalo**
   Waa inaad laanta socdaalka USCIS markasta oo aad guurtid soo wargelisid. Waa inaad mudo10 maalmood gudaheed ah ku soo wargelisid. Isticmaal akoonkaaga USCIS ee khadka (online) ama waxaad isticmaashaa foomka AR-11, Ciwaan badalida. Akhri xogta urursan *U soo Sheegida Ciwaan Bedelida USCIS*. Jooji buuxinta foomka AR-11 Hadii qaadatid dhalashada Maraykanka.

3. **Ragga Qaarkii waa inay iska Diiwaangeliyaan hay'adda kaydka ciidamada**
   Inta badan ragga ku nool Marykanka ee da'doodu u dhaxayso 18-25 sano waa inay iska diiwaan geliyaan hay'adda kaydka ciidamada.Hay'addani waxay macluumaadkan u

isticmaali kartaa hadii mar uun dawlada Maraykanku u baahato dad ciidamada ka mid noqda.

Iska diiwaan geli barta internetka halkan www.sss.gov ama meelkasta oo boostada Maraykanku ku taalo.

4. **Cusboonaysiinta Sharciga Deganaanshaha (LPR Card)**
   Inta badan kaarka deganaanshaha (LPR) waxaa ku qoran wakhtiga uu dhacayo. Taa macnaheedu ma aha insharcigii kaa dhacay marka kaarku dhaco, weli waad ka shaqaysan kartaa kuna noolaan kartaa wadanka Maraykanka laakiin waxaa lagaa rabaa inaad kaar cusub dalbatid si'aad u haysatid cadayn muujinaysa inaad sharci deganaansho(LPR) oo shaqaynaya leedahay. Sida caadiga ah kaarkaaga deganaanshuhu (LPR) mudo 10 sano ah ayuu ku dhacaa. Buuxi arjiga dib u cusboonaysiinta kaarka degananshaha (LPR ) mudo 6 bilood ka hor ah taariikhda uu dhacayo. Waxaad isticmaashaa Foomka I-90, Arjigiisa si'aad u dalbatid kaar cusub oo ah Sharciga degenaanshaha rasmiga ah. Akhri xogtan urursan si'aad macluumaad dheeraad ah *Bedelida ama Cusboonaysiinta Kaarkaaga Deganaanshaha Rasmiga ah ("Green Card")*.

***Hadii hadda ka hor lagu xiray ama dembi lagugu soo oogay, la tasho qareen ka hor inta aadan buuxin arjiga aad ku dalbanaysid dib u cusboonaysiinta kaarka deganaanshah ( LPR card).***

## Maxay yihiin waxyaabaha keeni kara in layga qaado kaarka Deganaanshaha Rasmiga ah (LPR)?

Waxaa jira dhawr sababood oo keeni kara in sharciga degenaanshaha rasmiga ah LPR lagaa qaado. Kuwan soo socda ayaa ka mid ah.

1. **Dembiyada.** Hadii lagugu helo dembiyada qaarkood, waxaa dhici karta in sharciga lagaa qaado laguna masaafuriyo. Dhawr tusaale hadaan soo qaadano waxaa ka mid hadii lagugu helo dembi dagaal qoyska dhexdiisa ah, xadgudub galmo ah, dhuumaalaysi ku gelin ama tahriibin,dambi la xiriira daroogo,faldembiyeedka hubka,tuugada qaarkeed, iyo wax isdaba marin. Sidoo kale hadii faldembiyeed lagugu helo way kala duwan tahay sida maxkamada dembiyada qaada u eegayso iyo sida laanta socdaalku u eegayso.

   - **Hadii lagu xiro ama dembi lagugu helo:** Waa inaad heshid qareen ah kuwa dembiyad difaaca. Qaadigu wuxuu kuu qaban karaa qareen lacag la'aan ah hadii dakhligaagu hooseeyo. Waana inaad hubisid in qareenka dembigaa kaa difacayaa uu la tashado qareen kuwa laanta socdaalka ah si sharcigaaga LPR loo bad baadiyo.

   - **Hadii hada ka hor dembi lagugu helay,oo maxkamada faldembiyeedku kiiskaagii mar hore xirtay:** La tasho qareen kuwa laanta socdaalka ah. Qareenka laaanta socdaalku wuxuu kuu sheegi karaa hadii sharcigaaga deganaanshuhu LPR khatar ugu jiro in lagaa qaado,sidoo kale wuxuu kuu sheegayaa hadii ay jirto si arintaa wax looga qaban karo.

- **Hadii aad doonaysid inaad safar ku aado meel ka baxsan Maraykanka ,laakiin hada ka hor lagu xiray ama adiga iyo boliiska dhib idin dhexmartay:** la tasho qareen kuwa laanta socdalka ah **ka hor** inta aadan safrin. Qareenka laanta socdaalku wuxuu kuu sheegi karaa inaad dhib la kulmi doontid markaad soo noqotid eed isku daydid inaad Maraykanka soo gashid.

2. **Hadii aad sheegatid inaad dhalashada Maraykanka haysatid adigoon haysan**. Weligaa ha sheegan inaad dhalashada Maraykanka haysatid adigoon haysan. Waxay noqonaysaa sheegasho been ah oo sharci jebin ah hadii aad beentaa u sheegtid, laanta socdaalka, dawladda dhexe ama gobolka. Waxaa ka mid ah hadii aad isku daydid inaad shaqo ku heshid ama codaysid. Waxaa iyadana sheegashada beenta ah ka mid ah inaad kor ugu dhawaaqdid ood tiraahdid waxaan haystaa dhalashada Maraykanka, ama aad qortid ama foom ku buuxisid ama aad isticmaaashid aqoonsi muujinaya inaad dhalashada haysatid . Hadii aad si been abuur ah u sheegatid inaad dhalashada haysatid waa lagaa qaadi karaa sharciga deganaanshaha LPR waana lagu masaafurin hadii aad si been abuura u sheegatid inaad dhalashada Maraykanka haysatid.

3. **Ha Codaynin. Hana isu diiwaan gelinin inaad codaysid.** Gobolka Minnesota, keliya waxaa codaykara ama isu diiwaan gelin kara inay codeeyaan dadka haysta dhalashada. Inta badan meelaha kale oo dhana sharcigan ayaa ka jira. Hadii aad u malaynaysid inaad u codayn kartid mid ka mid ah dadka xafiisyada u ordaya ee degaanka aad ku nooshahay, si’aad u hubusid marka hore la tasho qareen ah kuwa laanta socdaalka inta aadan doorashada isu diiwaan gelin . Waxaa dhici karta in sharciga deganaanshaha lagaa qaado laguna masaafuriyo hadii aad si sharci daro ah u codaysid ama aad si sharci daro ah isugu diiwaan gelisid si’aad u codaysid.



4. **Mudo Dheer oo Maraykanka Dibadiisa Lagu Maqnaado.**Hadii aad mudo aad u dheer ka maqnaatid wadanka Maraykanka waxaa laga yaabaa inaad khatar gelisid sharcigaaga deganaanshaha iyadoo loo tixgelinayo inaad wadanka “ka maarantay” ama waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad dhalashada qaadatid. Sida caadiga ah hadii aad 6 bilood ka yar maqnaataa dhib ma laha. Marka hadii aad rabtid inaad wadanka Maraykanka ka maqnaatid mudo 6 bilood ka badan intaadan bixin la tasho qareen kuwa laanta socdaalka ah.Waxaa laga yaaba in lagaa doonayo in inta aadan wadanka ka bixin **ka hor** aad dalbatid ogolaanshihii aad wadanka ku soo geli lahayd markaad soo noqotid.

## Maxay tahay xuquuqdaydu?

Marka aad haysatid LPR, waxaa jira xuquuqo aad leedahay iyo fursado aad haysatid. Xuquuqahaas iyoFursadahaas waxaa ka mid ah kuwan:

- **Waxaad dalban kartaa in qof qoyskaaga ka mid ah Fiiso ama Sharci la siiyo**
  Marka aad haysatid LPR, waxaad codsan kartaa in laguu keeno xaas/ninkaaga. Sidoo kale waxaad codsan kartaa in laguu keeno caruurtaada aan weli guursan.

- **Gargaarka Dawladda**
  Waxaa laga yaabaa inaad caawimo ka heshid barnaamijyada dawladda ee dadka caawiya. Waxayna ku xiran tahay Meesha aad ku nooshahay iyo sida aad ku heshay sharciga LPR.



  **Caymiska Caafimaadka**
  Hadii aad haysatay caymis caafimaad oo shaqadaadu ku siisay intii aaadan helin sharciga LPR. Waxba iskama badalayaan. Laakiin hadaadan hore u haysan caymis caafimaad, waxaa laga yaabaa in markaad heshid sharciga LPR aad buuxisid shuruudihii caymiska caafimaadka lagu helayay sidaana aad ku heshid caymis. Goboladu waxay leeyihiin caymisyo iyo shuruuc kala duwan.

  Gobolka Minnesota, hadii aad haysatid LPR waxaa laga yaabaa in lagu siiyo caymiska gobolka ee lacag la'aanta ah ama mid gobolku qayb kaa bixinayo. Shuruudaha la 'eegayo waxay ku salaysan yihiin inta uu dhan yahay dakhliga soo gala dadka guriga ku wada nool iyo waxyaalo kale. Caymiskan waxaad ka dalban kartaa barta internetka ee MNSure adigoo booqanaya bogga www.MNsure.org. Sidoo kale waxaa dalbashada kaa caawin kara rugaha caafimaadka,isbitaalada iyo hay'addo kale. Waxaa jira dad la yiraa "Hagayaal" kuwaas oo kaa caawinaya sidii aad u dalban lahayd caymiska. Si'aad macluumaad dheeraad ah u heshid la xiriir xafiiska qareenada dadka caawiya ee degaanka aad ku nooshahay.

- **Safar**
  Hadii aad haysatid sharciga LPR waad safri kartaa. Waxaa laga yaabaa inaad dhalashada wadanka u baahan tahay. La tasho qareen kuwa laanta socdaalka ah hadii hada ka hor lagu xiray ama dembi lagugu helay.

- **Codsashada Dhalashada Maraykanka**
  Inaad noqotid qof haysta dhalashada Maraykanka faa'iido badan ayaa ku jirta. Qofka dhalashada haysta lama masaafurin karo.Dadka haysta deganaanshaha rasmiga ah LPRs waa inay qareen la tashadaan inta ayna codsan dhalashada. Akhri xogta urursan adigoo booqanaya *Noqoshada Muwaadin Maraykan (U.S.) ah*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**